SOMALILAND NATIONAL BUDGET LAW as passed by the House of Representatives on 10 May 2010. This Law repeals the provisios of the 1996 Financial & Accounting Procedures of the State and its Regulations but only in so far as they relate to the national budget. The Law brings the budgetary arrangements in line with the Somaliland Constitution and replaces the 1996 Law (which simply endorsed the continued use of the 1962 law of the same name). The House has repeatedly taken the government to task for the way public finances, and in particular revenues, ar dealt with and for the frequent delays in both the submission of "incomplete" budgets and the annual accounts.

As a financial bil, this Law, which was introduced by the House of the Representatives, will be going directly to the President for his signature. Government ministers have already criticised this law

www.somalilandlaw.com

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
XEERKA MIISAANIYADA QARANKA
XEER NO. 44/2010

GOLAHA WAKIILADU

Markuu arkay: Qodobada 37aad, 38aad, 53aad, 54aad, 55aad, 74aad ee Dastuurka JSL

Markuu Aqoonsaday: Waajibka Dastuuriga ah ee ka saaran Golaha Wakiilada miisaaniyadda, xeerarka maaliyada iyo dhammaan arrimaha la xidhiidha ee ay ka mid tahay dabagalka iyo ilaalinta hantida qaranka.

Markuu arkay: Baahida loo qabo in la diyaariyo xeer lagu nidaamiyo habka diyaarinta, ansixinta, fulinta iyo dabagalka miisaaniyadda.

Markuu xaqiiqsaday: In aanu jirin xeer hore oo loo raacaa diyaarinta iyo ansixinta Miisaaniyadda ujeedaduna tahay in xeerkan xalilo habraaca arrimaha Miisaaniyada JSL.

Markuu aqoonsaday: In miisaaniyaddu tahay mid soo noqnoqonaysa oo sanad kasta loo baahan yahay in la diyaariyo, la ansixiyo, la fuliyo lana dhaqangeliyo.

Markuu ogaaday: In miisaaniyaddu halbawle u tahay socodsiinta hawlaha qaranka una baahan tahay in tub haboon loo jeexo diyaarinteeda, ansixinteeda, fulinteeda iyo
Dabagalkeeda

Markuu tixgeliyay: Doodihii, aragtiyihii iyo afkaartii qiimaha lahayd ee qaybaha kala duwan ee bulshada sida, aqoonyahanada, sharci yaqaanada iyo mudanayashu ka soo jeediyeen si loo helo xeer miisaaniyadeed oo ku dhisan aqoon lagana wada qayb qaatay doooddiisa.

WUXUU SOO SAARAY

XEERKA MIISAANIYADA QARANKA

Qodobka: 1aad
Erey-bixin

Miisaaniyad: *Waxaa loola jeedaa odoroska xaddiga lacageed ee kharash iyo dakhli isu-dheelitiran sanad maaliyadeedka.*
Sharci*: Waxaa loola jeedaa xeerarka dhaqangalka ah ee JSL.*
Xeer*: Waxaa loola jeedaa xeerka miisaaniyadda Qaranka.*
Dakhli: *Waxaa loola jeedaa odoroska dakhli (estimate) ee la filayo in soo xarooda sanad maaliyadeed iyo daymaha ay xukuumadu u amaahato si sharciga waafaqsan.*
Dakhli dheeraada *Waxaa loola jeedaa dakhliga dheeraadka ah ee u gudbay sannad Maaliyaddeedka dambe ama kharash aanay isticmaalin ciddii loo qoondeeyey (hadhaa).*
Kharash*: Waxaa loola jeedaa lacagta ku baxda sanad-maaliyadeedka laamaha Hayadaha Dawladda.*
Dhinaansho: *Waxaa loola jeedaa hoos u dhaca ama dhinaansho ku yimid* dakhli *La- filaya.*
Gole: *Waxa loola jeedaa Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland.*
Odoroska Miisaanioyada*: Waxaa loola jeedaa jaangoynta mustaqbalka dakhli iyo kharash isu dheelitiran.*
Hadhaa kharash: *Waxa loola jeedaa kharash aanay isticmaalin ciddii loo gudbiyay.*
Lacag*: Waxaa loola jeedaa lacagta Somaliland (shilin).*
Miisaaniyad gaar ah*: Waxaa loola jeedaa miisaaniyad u gaar ah hay-ad ama maamul (institution) kale oo aan miisaniyadiisu ku jirin ta qaranka oo leh Madaxbanaani maamul iyo dhaqaale.*
Xisaab-xidh*: Waxaa loola jeedaa soo gudbinta dakhliga iyo kharashka dhabta ah ee sanad Maaliyaddeed.*
Kaabis Miisaaniyadeed*: Waxaa loola jeedaa dakhli iyo kharash isu dheelitiran oo miisaaniyada dheeraad ka ah lana isticmaalayo waqti cayiman oo sannad maaliyadeedka ka mid ah oo soo baxay.*
Hadhaa dakhli*: Waxaa loola jeedaa dekhli ka soo hadhay ku talo-galka sanad Maaliyadeedkii hore (Surplus)*
Kharash Dheeraad ah *Waxaa loola jeedaa kharash ka baxsan miisaaniyadda la Ansixiyey*
Guddi*: Waxaa loola jeedaa Guddida ku shaqada leh miisaaniyada ee Golaha Wakiilada*
Hanti-dhawr*: Waxaa loo jeedaa hanta-dhawrka guud ee qaranka*
Wasaarad*: Waxaa loola jeedaa wasaaradda maaliyadda.*
Wasiir*: Waxaa loola jeedaa wasiirka maaliyadda.*

CUTUBKA 1AAD
DIYAARINTA

Qodobka 2aad
Miisaaniyad

1. Miisaaniyad waa odoroska dakhliga iyo kharashka ku baxa qaranka sannad maaliyadeed gudihii oo isu dheelitiran.
2. Miisaaniyaddu waxay ka kooban tahay odoroska kharash ee ku baxaaya fulinta hawlaha dawlada iyo odoroska dakhli ee la filaayo inuu ka soo baxo ilaha kala duwan ee dhaqaalaha qaranka.
3. Miisaaniyadu waxay kaga duwan tahay mashaariicda sharci:
    b) Waxaa soo jeedinteeda iyo diyaarinteeda iska leh Xukuumadda oo keliya.
    t) Waxaa dhaqangalkeedu ku xadaysan yahay sannad maaliyadeed keliya.
    j) Mooshin kuma soo jeedin karaan xubnaha Golaha Wakiiladu diyaarinteeda iyo wax ka bedelkeeda
    x) Waxa ansixinteeda iska leh Golaha Wakiilada.
    kh) Miisaaniyada waxaa Dastuurku ku jideeyay Qodob gaara oo ah 55, halka mashruucyada sharci uu Dastuurku ku jideeyay kuna nidaamiayay qodobo gaar ah sida 77, 78 Dastuurka
    d) Fulinteeda iyo hirgelinteeda waxaa u xilsaaran Wasaaradda Maaliyadda marka Goluhu ansixiyo , Madaxweynuhuna digreeto ku soo saaro.
    r) Waxaa nidaamiya xeerka miisaaniyadda.
4. Miisaaniyada Golaha Wakiiladu hal mar ayuu ansixin karaa dibna looguma soo celin karo sanad maaliyadeed gudihii, marka laga reebo xaaladaha:
    b. Soo jeedin miisaaniyad kaabid ah (supplementary Budget)
    t. Soo jeedin dib u meelayn kharash (relocation)
    j. Soo jeedin ogolaansho gelitaan kharaash miisaaniyada ka baxsan duruufo gaara ah darteed

Qodobka: 3aad
Dakhli

1. Dakhligu wuxuu ka kooban yahay, cashuuraha, takaaliifaha iyo khidmadaha kala duwan ee sharcigu jideeyay, kaalmada, dakhliga kale ee ilaha kala duwan ee dhaqaalaha qaranka ka soo baxa, daymaha qaranku soo daynsado, hadhaaga hore ee sanadaha hore markuu jiro iyo maaliyad kasta oo kale oo si sharciga waafaqsan dalka u soo gala ama la filayo in uu u soo gelayo.
2. Miisaaniyada laguma jidayn karo cashuuro cusub, takaaliif iyo khidmado aan hore loo ansixin miisaaniyada la ansixiyay xukuumadu kuma qaadi karto cashuur, takaaliif iyo khidmaddo cusub.
3. Miisaaniyadda la ansixiyay xukuumadu kuma qaadi karto Cashuur, takaaliif iyo khidmaddo cusub.

Qodobka: 4aad

Kharash

Wuxuu ka kooban yahay kharashka loo qoondeeyay in uu ku baxo sanad maaliyadeedkaa waaxyaha sharci dejinta, fulinta, garsoorka iyo hay'adaha kale ee qaranka dhinacyada adeega bulshada, dhaqaalaha iyo wax soo saarka, N/gelyada iyo Cadaaladda, maamulka iyo Siyaasadda, Horumarka iyo mashaariicda dalka iwm.

Qodobka: 5aad
Sannad maaliyadeed

Sannad maaliyadeedka Somaliland wuxuu ka bilaabmaa 1da January, wuxuuna ku dhamaadaa 31ka December.

Qodobka: 6aad
Habka Qorshaha Diyaarinta Miisaaniyada

1. Wasiirka Maaliayadu isaga oo ka qiyaas qaadanaya lixda Bilood ee hore ee sanadka iyo sanadkii ka horeeyey, wuxuu ku dhawaaqayaa 1-da July siyaasada guud ee miisaaniyada, meelaha mudnaanta la siinayo iyo wadarta guud ee Odoroska miisaaniyada, waana in ku dhawaaqista laga baahiyaa qalabka warbaahinta dalka.
2. Wasaarad waliba iyo hay'ad-waliba Waxay u soo gudbinaysaa 15 July barnaamijkeeda siyaasadeed, Qorshaheeda iyo meelaha ay mudnaanta siinayso guddiyada Golaha ee ay wada shaqaynta leeyihiin.
3. Guddiyada Golaha Wakiilada iyo Wasaaraduhu waxay ka yeelanayaan dood iyo falaqayn, waxayna guddi-waliba warbixinteeda u gudbinaysaa guddida u qaabilsan miisaaniyada Golaha (Golaha Wakiilada) ugu danbayn 5 August.
4. Guddida miisaaniyada ee Goluhu waxay isku geynaysaa dhamaan warbixinadaas, waxayna u gudbinaysaa shirgudoonka mudo aan ka badnayn 10 Maalmood, iyadoo Gudoomiyaha Goluhuna u gudbinayo Madaxweynaha talooyinka iyo warbixinaha oo ay ku dhan-yihiin wixii ay ka doodeen guddiyada, wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawlada ugu badnaan 7 Maalmood.
5. Madaxweynuhu marka uu helo talooyinka Golaha Wakiilada waxa uu si toos ah ugu gudbinayaa wasaarada maaliyada, si ay ugu darsato qorshaha Odoroska miisaaniyada.

Qodobka: 7aad
Diyaarinta Miisaaniyada

1. Odoroska miisaaniyada waxaa diyaarinaya Wasaarada maaliyada, iyadoo ka duulaysa awooda dhaqaale ee dalka, iyadoo laga tilmaan qaadanayo talooyinkii Golaha Wakiilada, miisaaniyadaha labadii sano ee u danbeeyay iyo xaalad kasta oo korodh ama hoos u dhac dhaqaale ee dalka ku soo kordhay.
2. Wasaaradu marka diyaarinayso (gudbiyaan) odoroska miisaaniyada waxay ka dalbanaysaa maamul (Institution) kasta oo qorshe miisaaniyadeed u gaar ah leh in ay soo gudbiyaan qorshaha kharashkooda ee sanad miisaaniyadeedka soo socda, iyadoo kala tashanaysa wixii is

bedel ah ee wasaaradu baahiyaha la soo gudbiyay ay ku samaynayso, balse mar kasta go'aanka qoondaynta miisaaniyada waxaa leh wasaarada maaliyada.

3. Wasaaradu marka ay dhamaystirto nuqulka hordhaca ah ee miisaaniyada oo u qaabaysan si waafaqsan xeerka miisaaniyadda, xeerarka maaliyadda iyo xisaabaadka dalka, waxay u gudbinaysaa Golaha Wasiirada si uu u ogolaado ugu danbayn 30ka September.

4. Golaha wasiiradu markuu derso odoroska miisaaniyada hordhaca ah ee wasaarada Maaliyadu soo gudbisay, waxay ku samaynayaan deraasad in ay sharci ahaan iyo qaab ahaan dhamaystiran tahay, iyagoo:

(b) Haddii ay arkaan in madamadaw ama khaladaad ku jiro dib ugu celin kara Wasaarada Maaliyada si ay u soo saxdo, muddo aan ka badnayn 14 maalmood

(t) Haddii ay arkaan in ay ku jiraan khaladaad la sixi karo way saxayaan

(j) Haddii qaab ahaan, xisaab ahaan iyo sharci ahaan ay dhamaystiran tahay, waxay ku ogolaanayaan go'aan Gole hal dheeri (simple Majority)

5. Hay'ad kasta ama maamul kasta oo qoondaynta miisaaniyada kaga cabanaya Wasaarada Maaliyada, wuxuu todobada maalmood ee ugu horeeya bisha oktoobar cabashadiisa oo sababaysan ugu gudbin karaa Wasaaradda Maaliyadda.

6. Golaha wasiiradu marka uu saxo wixii khaladaad ama madmadaw ku jira miisaaniyada go'aana ka gaadho wixii cabasho ah, wuxuu nuqulka uu ansixiyay ee odoroska miisaaniyada u gudbinayaa Golaha Wakiilada ka hor 31ka Oktoobar

Qodobka: 8aad

Odoroska Miisaaniyada waxyaabaha uu xambaarsan yahay

1. Odoroska Miisaaniyada hordhaca ah waxaa ku jiraya:

b.) Dakhli kasta oo la filaayo inuu ka soo hoyanayo cashuur kasta oo sharci lagu jideeyay

t.) Dakhli kasta oo ka soo bixi kara khidmad hawl dawladu qabanayso oo sharci waajibiyay

j) Dakhli kasta oo ka soo baxay heshiis ama hanti qaran oo la iibiyey ama la kireeyay

x) Kaalmo dhaqaale oo kasta oo xukuumada ka soo gasha dalka dibediisa ama dalka gudihiisa oo xukuumada ama hay'adaheedu maamulayaan, ama fulinyaan ama gacantooda soo maraya

kh) dakhli kasta oo ku soo gelaya qaranka dayn, marka aanay dayntu ahayn mid mashruuc gaara loo qoondeeyay oo miisaaniyadiisa gaar goluhu ugu ansixiyay

d) Hadhaa kasta oo ka hadhay dekhli miisaaniyeedkii sanadkii tagay.

r) Macaash kasta oo ka soo hoyda hanti, khayraad ama raasamaal qaranku leeyahay ama qayb leeyahay oo wax soo saarta.

s) Kharash kasta oo ay isticmaalayso Wasaarad kasta, wakaalad kasta, hay'ad kasta oo xukuumada ah ama hayad madaxbanaan oo qaran, shirkadkasta, iskaashato kasta oo Dawladu leedahay ama wax ku leedahay.

sh) Kharash kasta oo ay isticmaalayso Waaxda Xeer-dejinta dalka iyo Kharash kasta oo ay isticmaalayaan waaxda Garsoorku

dh) Kharash kasta oo loo qoondeeyay in uu ku baxo ciidan kasta oo qaran

c) Kharash kasta oo loo qoondeeyay xafiis kasta ama wakiil kasta oo debadeed oo JSl leedahay

g) Kaalmo ama kabis kasta oo hay'ad rayid ah ama dan guud fulinaysa ama cid kasta oo kale oo danta qaranka dartii dhaqaale loogu kaalmaynayo ama loo kaabayo.
f) Kharash kasta oo kale oo si sharciga waafaqsan loogu qoondeeyay guddi, hay'ad ama cid gaara oo hawl gaara oo qaran fulinaysa si waqtiile ah. Iyo Kharash-garaynta dakhli kasta oo kale oo Xukuumada ama hay'adaheeda.

Qodobka: 9aad
Miisaaniyado Gaara

1. Hay'adaha, Wakaaladaha, Baananka iyo Maamul kasta oo Dawladeed oo adeeeg gaara qabta oo leh dakhli iyo kharash u gaara, marka aan dakhligooda iyo kharashkooda lagu darin miisaaniyada qaranka waxay yeelanayaan miisaaniyado u gaara oo ku lifaaqan miisaaniyada qaranka.
2. Maamul kasta oo ku sheegan faqrada kowaad ee qodobkan waa inuu yahay mid leh madaxbannaani maamul iyo dhaqaale oo u gaara Golaha Wakiiladuna ansixiyey madaxbanaanidiisa.
3. In warbixinta xisaabxidhada maamulada madaxabannaan la soo raaciyo xisaabxidhka guud ee hantidhawraha.
4. Maamulada ku sheegan faqrada kowaad ee qodobkan waa in dakhligiisa iyo kharashkiisu is daboolayaan, haddii ay kala badan yihiin, waa in ay miisaaniyada ku cadahay, halka kharashka dheeriga ah laga kabayo ama halka dakhliga dheeriga ah lagu bixinayo, marka aanay cadayn in kayd loogu dhigayo.
5. Hay'adaha miisaaniyadaha gaarka ah leh, waxaa dakhligooda ku jiraya kaalmo kasta oo la filayo in ay hesho, hadhaa kasta oo sannado hore dakhligooda uga soo hadhay iyo dayn kasta oo la filayo in ay qaadato, sidoo kale waxaa kharashkooda ku jiraya dayn kasta oo hore ay u qaadatay ama loogu leeyahay
6. Khidmadaha maamulada qodobkan ku xusani ay ka qaataan adeegyada ay qabtaan ama bixiyaan ee miisaaniyadoodda lagu soo cayimayaan waxay noqonayaan kuwo hore loogu jideeyay sharci maaliyadeed oo Golaha wakiiladu ansixiyay

Qodobka: 10aad
Lifaaqa miisaaniyada la raacinayo

1. Miisaaniyada qaranka ee Golaha Wakiilada loo gudbinayo waa in ay weheliyaan warbixinahan:
   b. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan macluumaad kasta oo la xidhiidha dakhliga iyo kharashka
   t. Sababaha korodh kasta ama dhimis kasta oo dhakhli ama kharash
   j. Siyaasad maaliyadeed ka (financial policy) ee xukuumadda ee sannad maaliyadeedkaas
   x. Warbixinta Daymaha qaranka iyo faahfaahintooda
   kh. Warbixinta deeqaha Qaran ee la filayo in la helo hadii ay jiraan
   d. Warbixinta dhigaalka qaranka
   r. Warbixinta mashaariicda horumarineed ee qaranka

2. Miisaaniyada qaranka ee Golaha loo gudbinayo waxaa kale oo wehelinaya lifaaqyadan iyo tixraacyadan:
b. Miisaaniyaha gaarka ah ee maamulada ku sheegan faqradaha qodobka sagaalaad (9) aad ee Xeerkan
t. Tixraaca xeerarka lagu jideeyay, haddii ay miisaaniyada ku jiraan, jidayn, dhimis ama korodh cashuur, takaaliif ama khidmado aan sanadaha hore ku jirin ama hore aan sharci loogu jidayn
j. Tixraaca xeerarka lagu dhisay haddii ay miisaaniyada ku jiraan maamulo cusub oo aan miisaaniyaha hore ugu jirin.

3. Waxaa kaloo miisaaniyada la soo raacin karaa waxbixin, sababayn, cudur daar ama faahfaahin kasta oo kale oo Golaha xukuumadu u arko in uu wax ka tarayo fahamka iyo ansixinta Golaha wakiiladda ee miisaaniyada.

4. Haddii ay xukuumadu rabto inay iibiso hanti ma guurto (fixed asset) ah isla sannad maaliyadeedkaa waxay xukuumadu u soo gudbinaysaa Golaha Wakiiladda sabbbta loo iibinayo hantida, xadiga iyo qiimaha hantida, iyo cadaynta hantida (dhul,dhisme ama saami shirkadeed iwm). Waxaana lagu cadaynayaa miisanaayada.

CUTUBKA 2AAD
ANSIXINTA

Qodobka: 11aad
Awoodda gaarka ah ee Golaha Wakiilada ku leeyahay miisaaniyada

Golaha Wakiiladu wuxuu awood u leeyahay in uu miisaaniyada xukuumadu soo jeedisay ku go'aansado sadexdan qodob mid uun:-

b. In uu sida loogu soo gudbiyay aqlabiyad ugu ansixiyo
t. In uu aqlabiyad ku celiyo gebi ahaanba
j. In uu wax ka bedelo, wax ka bedelkiisana aqlabiyad ku ansixiyo

Qodobka: 12 aad
Xad ka reeban Golaha wax ka bedelka miisaaniyada

1. Golaha Wakiiladu nuqulka hordhaca miisaaniyada ee Golaha xukuumadu u soo gudbisay wax ka bedel waa ku samayn karaa marka laga reebo xaaladahan:
b. Sameyn madaxyo ama madax ku-xigeenno cusub
t. Wax ka bedel saameeya wadarta guud ee misaaniyadda (Total) kharash iyo dhakhli labadaba ee Golaha Wasiiradu u soo gudbiyeen Golaha Wakiilada JSL.

Qodobka: 13aad
Soo Gudbinta miisaaniyada

1. Miisaaniyadu hordhaca ah waa in ay Golaha ku timaadaa go,aanka Golaha Wasiiradda, ka dib marka ay Golaha Wasiiradu soo ansixiyaan

2. Wasiirka maaliyadu wuxuu ka hor akhriyaya fadhiga Golaha Wakiilada warbixintiisa miisaaniyada uu ku lafa gurayo xaalada guud ee dhaqaalaha dalka wuxuuna si fiican uga waramayaa arimahan:-

b) Dakhliga
t) Kharashka
j) Hadhaa (surpluse)
x) Daymaha (loans)
kh) Deeqaha (grants)
d) Cashuur dhimis haday jirto
r) macluumaad kasta oo miisaaniyada la xidhiidha.
S) Mashaariicda horumarineed

3. Marka warbixintu dhamaato mudanayaashu waxay waydiin karaan wasiirka wixii su'aal ama waxay ka dalban karaan iftiimin kasta oo ku saabsan miisaaniyadda hadal ahaan iyo qoraalba isla maalintaas ama maalin kale oo loo mudeeyey Wasiirka.

Qodobka: 14aad
U Gudbinta Gudidda Miisaaniyada ku Shaqada leh ee Golaha

1. Marka la dhamaystiro hawsha ku tilmaaman qodobka 13 aad Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu wuxuu u gudbinayaa odoroska miisaaniyadda (Draft Budget) Guddida miisaaniyada ku shaqada leh si ay u soo hubiyaan, talooyin iyo warbixina Golaha uga soo celiyaan. Iyadoo muddada dhamaystirka hawsha miisaaniyada uu xadidi-doono Gudoomiyaha Goluhu.
2. Guddidu waxay soo darsayaan odoroska miisaaniyada sharci ahaan, xaqiiqo ahaan iyo xisaab ahaan, islamarkaana si gooni-gooni ah ama si wadareed waxay wada-tashi iyo xog isweydaarsi la yeelanayaan Guddihoosaadyada Goleweynaha (Golaha Wakiilada) si gudi-kasta hawsha la xidhiidha xogteeda loogu sugo odoroska miisaaniyada.
3. Guddidu marka ay soo geba-gebeeyaan xog ururinta iyo wada tashiyada la xidhiidha Miisaaniyada waxay warbixin dhamaystiran u soo gudbinayaan Gole-weynaha, waxayna warbixintu koobaysaa:-

B. Aragtida guud ee dhismaha miisaaniyadda iyo mabaa'dida ay ku salaysan tahay
T. Kala Mudnaanta miisaaniyadu siisay baahiyaha dalka
J. Dhaliilaha iyo wanaaga ay la kulmeen
X. Wada tashiyada ay Wasaarada maaliyada ama Golaha xukuumada la yeesheen wixii Xal ay ka wada gaadheen iyo waxay isku af garan waayeen.
Kh. In miisaaniyadu tahay mid qaran (Comprenhensive National Budget) koobaysana dhamaan dakhliga iyo kharashyada xukummaada dhexe, hay'addaha madax banaan wakaaladaha iyo wixii la mida.
D. Waxyaabaha u suurageli waayay
R. Talooyinka iyo soo jeedimaha ay soo jeedinayaan oo sababaysan kuna salaysan sharciyadda dalka.

4. Guddigu waxay talo ku soo jeedin karaan:
   b. In odoroska miisaaniyada Golaha xukuumadu soo gudbisay sideeda loo ansixiyo, iyagoo sababta loo cuskadayna cadaynaya

t. In gebi ahaanba la diido odoroska miisaaniyada xukuumadu soo gudbisay dibna loogu celiyo xukuumada si ay miisaaniyad kale u soo diyaariso, iyagoo sababta loo cuskadayna cadaynaya.

j. In odoroska miisaaniyada xukuumadu soo gudbisay wax laga bedelo, iyagoo cayimaya meelaha wax laga bedelayo, sida loo bedelayo iyo sababaha loo bedelayo

Qodobka: 15aad
Waajibaadka Golaha iyo Guddiyadiisa ee Miisaaniyada

1. Guddihoosaad yada Golaha Wakiilada waxa waajib ku ah:

b) In ay u yeedhaan, waraystaan, su'aalo wadiiyaan, cadaymo iyo dhukumenti ka dalbadaan masuul kasta oo xil ka haya ama ka tirsan hay'adaha dakhliga soo saara ama hawshiisu dhinac uun kala xidhiidho miisaaniyada Golaha hortaal

t) Guddiyada Goluhu ama Guddi gaar ah (ADHOC COMMENTTE) waxay hawl u tegi-karaan ama macluumaad waydiin-karaan, xog ka raadin-karaan hay'ad kasta ama maamul kasta oo qaran leeyahay macluumaad khuseeya hawsha la xidhiidha miisaaniyada.

j) In ay adeegsadaan khabiiro, aqoonyahano ama xirfadle kasta oo ay uga baahdaan aqoon ama farsamo kasta oo hawshooda la xidhiidha,

x) In ay waydiiyaan, ka helaan macluumaad hay'ad, urur, wakaalad ama maamul kasta oo qaran oo miisaaniyadi u qoondaysan tahay ama miisaaniyad gaar ah leh ama kabis maaliyadeed uga qoondaysan tahay miisaaniyada sharuucda dhismahooda iyo macluumaadka la xidhiidha dakhligooda iyo kharshkooda.

kh) In ay ka ogaadaan wasaarad, hay'ad, wakaalad, urur, shirkad, wershad, deked, madaar, xarun daabacaad, xarun warbaahin, xafiis ama maamul kasta oo dawladu leedahay ama qayb ku leedahay oo soo saara dakhli ama qaada cashuur ama khidmad ama takaaliif ama iibiya alaab, adeeg ama wax soo saar macluumaadka ku saabsan dakhliga soo gala iyo sharciyada u jideeyay ama xadiday cashuurta khidmada, takaaliifta ama sicirka iibka alaabta, adeega ama wax soo saarkooda.

d) in ay arrimaha ku saabsan miisaaniyada hortaal kala kulmaan, wada tashi kala sameeyaan, talooyin uga jeediyaan, go'aanno kala gaadhaan masuuliyiinta Wasaarada maaliyada ama xafiisyada ee Xukuummadda ee ay khusayso, haddii ay wasaarad ama maamul dawladeed ka cabanayo qoondaynta miisaaniyada ay wasaarada maaliyadu u qorshaysay waxay u gudbin-karaan cabatinkooda guddida ay wasaarad ahaan wadashaqaynta leeyihiin.

Qodobka: 16aad
Doodda mudanayaasha ee miisaaniyada

1. Marka dhegaysiga warbixinta Guddida iyo su'aalaha mudanayaasha la gebagebeeyo, mudanayaashu waxay isu diiwaangelinyaan dooda miisaaniyad si waafaqsan xeer hoosaadka Golaha.

2. Mudanayaasha Goluhu waxay doodda miisaaniyada u dhiibanayaan si waafaqsan xeer hoosaadka Golaha

3. doodda mudanuhu waa in ay ku salaysan tahay sadexda aragtiyood ee ku xusan qodobka 11aad ee xeerkan
4. Doodda miisaaniyadu waa in ay ahaataa mid xidhiidh u socota maalmaha fadhiyada Golaha u cayiman oo aan kala go'in
5. Muddada doodda miisaaniyadu socoto ama marka ay dhammaatoba shirgudoonku wuxuu fadhiga Golaha ugu yeedhi karaa masuul kasta ama sarkaal kasta oo ay mudanayaashu dalbadaan si wax looga waydiiyo arrimo miisaaniyada khuseeya, markaa sidaa shirgudoonku lama huraan u arko.

Qodobka: 17 aad
Cod u qaadista Miisaaniyada

1. cod u qaadista miisaaniyada waxa loo raacayaa soo jeedimaha mudanayaasha ee ku salaysan qodobka kow iyo tobnaad (11) aad ee isla xeerkan oo ah
   b. In sideeda loo ansixiyo odoroska miisaaniyadda
   t. In kaabis iyo wax ka badal lagu sameeyo odoroska miisaaniyadda
   j. In aqlabiyad ku celiyo gebi-ahaan
2. Xaalada ku xusan faqrada kowaad xarafka (b) ee qodobkan, haddii Goluhu ku ogolaan waayo aqlebiyada fudud (hal dheeri inta joogta),soo jeedinta miisaaniyada sidii xukuumadu ku soo gudbisay, wuxuu noqonayaa Go'aanka Goluhu in la celiyay miisaaniyada.
3. Xaalada ku xusan faqrada 1aad xarafka (t) ee qodobkan, hadii goluhu ku ogolaan waayo cod hal dheeri ah kaabistta iyo wax ka badalkii la soo jeedieyey miisaaniyadu side xukuumadu ku soo gudbisay ayey ku ansaxaysaa ;
4. Xaaladaha ku xusan faqrada 1aad xarafka (j) ee qodobkan, haddii goluhu ku ogolaan wayo cod hal dheeri ah in miisaaniyadda la celiyo waxay miisaaniyadu ku ansaxaysaa sidii xukuumadu ku soo gudbisay.
5. Guddoomiyaha Goluhu wuxuu cod gelinayaa soo jeedinta leh aqlabiyadda doodda mudanyaasha iyo diidmadeeda**.**

Qodobka: 18 aad
Celinta Miisaaniyada

1. Marka go'aanka Goluhu noqdo in la celiyo miisaaniyada, waxaa lagu celinayaa xukuumada si ay wax uga soo bedesho.
2. Xaalada faqrada hore ee qodobkan, shirgudoonku wuxuu diyaarinayaa go'aanka celinta miisaaniyada oo sababaysan 7 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta go'aanka dib-u-celinta miisaaniyada ee Goluhu gaadhay, wuxuuna u gudbinayaa M/waynaha
3. Go'aanka Golaha waa in ay ku xusan tahay asbaabta miisaaniyada Goluhu ansixin la'aanteeda u cuskaday, waxaa kale oo wehelinaya tallooyinka iyo tilmaamaha Golaha ee miisaaniyada danbe laga rabo.
4. Go'aanka shirgudoonku xukuumada dib ugu celinayo miisaaniyada wuxuu u cayimayaa waqtiga ay tahay in xukuumadu mar labaad ku hor keento miisaaniyadda muddo ka badnayn 45 maalmood

5. M/waynuhu marka uu helo go'aanka celinta miisaaniyada ee Golaha Wakiilada wuxuu sida ugu dhaqso badan ugu gudbinyaa wasaarada Maaliyada isagoo u xadidaya waqtiga ay tahay in wasaaradu ku horkeento miisaaniyada Golaha wasiirada mar labaad, waqtigaas oo ugu yaraan ka horeeya laba todobaad waqtiga Golaha wakiiladu xukuumada u cayiamay

Qodobka: 19 aad
Ansixinta Miisaaniyada

1. Marka Goluhu ku ansixiyo miisaaniyada sidii xukuumadu ku soo gudbisay, gudoonka golaha Wakiiladu wuxuu diyaarinayaa go'aanka ansixinta miisaaniyada sida ugu dhaqso badan oo aan ka badnayn 14 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka ansixinta miisaaniyada uu Goluhu gaadhay
2. Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu wuxuu raacinayaa haddii ay jiraan wax tallooyin iyo soo jeedimo ah oo Guddida ku shaqadaleh miisaaniyada ama Goluhuba u soo jeediyay xukuumada wuxuuna u gudbinayaa M/waynaha.
3. M/waynuhu marka uu helo go'aanka ansixinta miisaaniyada ee Golaha Wakiilada, wuxuu 14 maalmood gudahood ku soo saarayaa go'aanka dhaqangelinta miisaaniyada wuxuuna u gudbinaya Wasaarada Maaliya isagoo ugu lifaaqaya wixii talooyin ah ama soo jeedin ah ee Goluhu soo raaciyay ee hoos yimaada awooda wasaarada Maaliyada, isagoo ogaysiina ka siinaya Gudoomiyaha Golaha Wakiilada.

Qodobka: 20^{aad}
Wax ka bedelka Miisaaniyada

1. Marka Goluhu ansixiyo wax ka bedelka miisaaniyada, Gudoomiyaha golaha Wakiiladu wuxuu diyaarinayaa go'aanka Golaha 7 maalmood gudahood.
2. Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu wuxuu raacinayaa haddii ay jiraan wax tallooyin iyo soo jeedimo ah oo Guddida ku shaqadaleh miisaaniyada ama Goluhuba u soo jeediyay xukuumada wuxuuna u gudbinayaa M/waynaha.
3. M/waynuhu marka uu helo go'aanka wax ka badalka miisaaniyada ee Golaha Wakiilada, wuxuu 7 maalmood gudahood ku soo saarayaa go'aanka dhaqangelinta miisaaniyada isagoo u gudbinaya Wasaarada Maaliya isagoo ugu lifaaqaya wixii talooyin ah ama soo jeedin ah ee Goluhu soo raaciyay ee hoos yimaada awooda wasaarada Maaliyada, isagoo ogaysiina ka siinaya Gudoomiyaha Golaha Wakiilada.

Qodobka: 21^{aad}
Dib u soo diyaarinta miisaaniyada Goluhu celiyay

1. Marka xaalada ku xusan qodobka 18aad ee xeerkan, wasaarada Maaliyadu hesho amarka M/waynaha ee dib loogu soo diyaarinayo miisaaniyada waxay diyaarinaysaa miisaaniyad cusub, iyadoo markasta wada tashi la yeelanaysa Guddi hoosaadka dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiilada.

2. Diyaarinta miisaaniyada cusub waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobada 6aad, 7aad, 8aad, & 9aad ee xeerkan, marka laga reebo muddooyinka ku xusan faqradaha 3aad & 6aad ee Qodobka 7aad ee xeerkan.
3. Dib u diyaarinta miisaaniyada la soo celiyay, waxay wasaarada iyo Golaha xukuumaduba xoog saarayaan, sixitaanka iyo toosinta dhaliilaha Goluhu ku soo celiyay miisaaniyadii hore iyo dib ugu habaynta tallooyinkii iyo soojeedimaha Goluhu soo raaciyay,waxayse ku samayn karaan wax ka bedel cusub meelaha qaar markay lama huraan u arkaan.

Qodobka: 22aad
Ansixinta Golaha Wakiilada ee Miisaaniyada dib loo diyaariyay

1. Marka Golaha Xukuumadu dib Golaha Wakiilada ugu soo gudbiyo miisaaniyada dib loo soo diyaariyay, Goluhu wuxuu deraasadeeda, hubinteeda iyo ansixinteeda u raacayaa tilmaamaha xeerkan ee lagu sheegay qodobada 11, 12,13, 14, 15, 16, 18, 19, marka laga reebo arrimaha ku xusan faqradaha soo socda ee qodobkan.
2. Golaha Wakiilada waxaa waajib ku ah in uu go'aan kaga gaadho miisaaniyada dib loogu soo gudbiyay muddo (30) maalmood gudahood ah laga bilaabo maalinta Go'aanka Golaha wasiirada M/waynuhu u soo gudbiyay Golaha Wakiilada.
3. Guddi hoosaadka golaha ee qaabilsan arrinta miisaaniyada waxay tallo ku soo jeedin karaan oo keliya in sideeda loo ansixiyo miisaaniyada xukuumadu dib u soo diyaarisay ama in wax ka bedel lagu sameeyo iyagoo soo jeedinaya wax ka bedel kasta oo ay la noqoto in lagu sameeyo.
4. Goluhu wuxuu ka doodayaa labada arrimood ee ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan, waxaana go'aanka Goluhu noqonayaa ka ay taageerto aqlibiyada mudanayaasha fadhiga ku sugan.
5. Marka Goluhu go'aanka ka gaadho miisaaniyada dib loo soo diyaariyay, waxaa la dabaqayaa tilmaamaha ku xusan faqradaha qodobada 23aad iyo 24aad ee Xeerkan.
6. Golaha Wakiiladu odoroska hal Miisaaniyada dib uguma celin karo laba jeer sanad maaliyadeed gudihii haddii la fuliyo asbaabihii loo cuskay celinteeda.

Qodobka: 23aad
Daahida miisaaniyada

1. Haddii sababta ku xusan qodobka 17 aad ee xeerkan ama sabab kale oo la garawsan karo ansixinta miisaaniyad sanadeedku dib uga dhacdo 31ka Diisembar, M/waynuhu wuxuu ugu yaraan 7 maalmood ka hor dhammaadka sanadka codsanayaa Golaha Wakiilada in ay u ogolaadaan ku dhaqanka miisaaniyadii sanadkii hore inta laga ansixinayo miisaaniyada cusub.
2. Marka laga reebo xaalada uu Goluhu dib u celiyay miisaaniyada ee ku xusan qodobka 18aad ee xeerkan iyo marka ay miisaaniyada cusub Golaha Wakiilada hortaal, M/waynuhu ma codsan karo ogolaanshaha ku xusan faqrada hore ee qodobkan.
3. Haddii ansixinta miisaaniyadu dib uga dhacdo bilawga sanad maaliyadeedka waxa lagu dhaqmayaa miisaaniyada sanadkii hore mudo aan ka badnayn sadex bilood.

Qodobka: 24 aad
Faraq xisaabeedka labada miisaaniyadood

1. Xaalada ku xusan qodobka 23 aad ee xeerkan, marka miisaaniyadii sanadkii hore ee loo ogolaaday in xukuumadu ku sii dhaqanto iyo miisaaniyada sanad maaliyadeedkaa Golaha Wakiiladu ansixiyo uu ku jiro faraq xisaabeed waxaa loo raacayaa tilmaamahan soo socda:

b. Haddii is barbardhiga muddada miisaaniyadii hore lagaga dhaqmay kharshka la isticmaalay uu ka yar yahay kharashka loo ansixiyay, hay'ad walba inta ka dhiman dib ayaa looga kabayaa, waa marka dakhliga miisaaniyada cusub uu sidii loo odorosay u soo baxay

t. Haddii is barbardhiga muddada miisaaniyadii hore lagaga dhaqmay kharshka la isticmaalay uu ka badan yahay kharashka loo ansixiyay, hay'ad walba kharashka dheeriga ah waa in dawladu kabto.

2. Marka laga reebo xaaladaha faqrada 1aad ee qodobka, wixii kale ee faraq labada miisaaniyadood u dhexeeya ah, xukuumadu dib ayay uga soo gudbinaysaa Golaha Wakiilada si uu ugu ansixyo.

3. Xaalada ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan, waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobada miisaaniyada kaabista ah (supplementary budget).

Qodobka: 25aad
Miisaaniyad kaabis ah (supplementary budget)

1. Marka xukuumada ay u soo baxdo ama ay u muuqato in uu u soo baxayo dakhli dheeraad ka ah odoroskii dakhli ee loo ansixiyay, ee ay lama huraan u aragto in sanadkaa la kharashgareeyo, waxay diyaarinaysaa miisaaniyad kaabis ah.

2. Miisaaniyada kaabista ah waa miisaaniyad kooban oo ku salaysan waqtiga sanadkaa ka hadhay, oo xambaarsan sifihii miisaaniyad sanadeedka, kuna cadahay dakhliga soo baxay ama soo baxaya iyo sida loo kharashgaraynayo oo madax-madax, hay'ad-hay'ad, gobol- gobol iyo waqti ku salaysan.

3. Wasaarada maaliyadu markay diyaariso miisaaniyada kaabista ah, waxay u gudbinaysaa Golaha wasiirada oo markuu ku qanco ogolaanaya ama wax ka bedel ku samaynaya go'aan ku ogolaanayaa, iyadoo M/waynuhu u gudbinayo Golaha Wakiilada si uu ugu soo ansixiyo.

4. Miisaaniyad kaabis ah waxaa Golaha xukuumadu soo jeedin karaa inta ka horaysa 30 sep. ee sannad maaliyadeedkaas.

5. Kaabis kasta oo miisaaniyadeed, waxaa lagu dhaqmi karaa oo keliya marka Golaha wakiiladu ogolaado.

Qodobka: 26aad
Ansixinta Miisaaniyada kaabista ah

1. Gudoomiyaha Golaha wakiiladu markuu helo soo gudbinta M/waynaha ee miisaaniyada kaabista ah, wuxuu u gudbinayaa guddida miisaaniyada ku shaqadaleh ee Golaha oo deraasad kooban ku soo samaynaya, iyagoo muddo kooban oo gudoomiyaha goluhu u cayimay, ku soo celinaya warbixintooda oo tallooyin xambaarsan

2. Gudoomiyaha Golaha wakiiladu markuu helo warbixinta Guddida, wuxuu cayimayaa maalinta jeedinta warbixinta, oo aan ka badnaan Karin 15 maalmood gudahood.

3. Marka gudoomiyaha guddi hoosaadku ama xubinta kale ee uu u igmadaa golaha ka hor akhrido warbixinta Guddida, mudanayaashuna Guddida waydiiyaan wixii su'aalo ah ama iftiimin ah, mudanayaashu waxay soo jeedinta Guddida uga doodayaan si waafaqsan xeer hoosaadka golaha
4. Goluhu uu u yeedhan karaa wasiirka Maaliyada ama masuuliyiinta kale ee Wasaarada maaliyada, si ay wax uga waydiiyaan miisaaniyada kaabista ah wax la xidhiidha.
5. Goluhu wuxuu u codaynayaa soo jeedinta golaha oo noqon karta in la ogolaado iyo in wax laga bedelo sida xukuumadu u soo jeedisay. Goluhu waa diidi karaa miisaaniyada kaabista ah, isagoo go'aaminaya in dakhliga dheeriga lagu daro kaydka qaranka ama lagu soo daro miisaaniyada sanad maaliyadeedka soo socda.
6. Xaaladaha Goluhu ogolaado ama wax ka bedelo miisaaniada kaabista ah, waxaa la dabaqayaa tilmaamaha qodobada 19aa iyo 20aad ee xeerkan.

Qodobka: 27 aad
Kharash dheeraad ah

1. Marka ay jiraan xaalado la garawsan karo, sida aafooyin, duruuf dagaal, duruufo N/gelyo xumo oo culus, ama xaalad kasta oo khatar ku ah bulshada ama qaranimada ama mashaariic horumarineed oo degdega, xukuumadu way dalban kartaa in loo ogolaado isticmaalka kharash dheereed ah oo aan miisaaniyada ku jirin.
2. Kharashka dheeraadka ahi wuxuu noqon karaa mid dakhli dheeraad ah laga bixinayo, mid kaydka qaranka laga bixinayo, mid xukuumada dayn u qaadanayso.
3. Kharash kasta oo dheeraad ka ah miisaaniyada la ansixiyay, waxaa ansixinaya Golaha Wakiilada ka hor intaan la gelin ama la isticmaalin.
4. Diyaarinta iyo ansixinta kharashka dheeraadka ah waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobada 25aad,iyo 26aad ee xeerkan, balse kharashka dheeraadka ah, haddii goluhu ku ogolaan waayo sida loogu soo gudbiyay ama isagoo wax ka bedelay ansixin waayo dalabkaasi waa burayaa.

Qodobka: 28 aad
Dib u meelayn kharash miisaaniyad la ansixiyay (relocation - *reallocation*)

1. Miisaaniyada marka la ansixiyo, haddii kharash loo qoondeeyay meel kale lagu isticmaalayo, waxaa loo raacayaa tilmaamahan soo socda:
   a) Haddii hay'ad, wasaarad ama maamul kale gudihii kharashka madax loo wareejinayo madax kale, waxaa ogolaanaya wasaaradda maaliyadda.
   b) Haddii hay'ad, wasaarad ama maamul kale gudihii kharashaka madax xigeen loo wareejinayo madax xigeen kale oo ay isku madax yihiin waxaa ogolaanaya Wasiirka Maaliyada
2. Marka laga reebo tilmaamaha faqrada hore ee qodobkan, kharash kasta oo kale oo meel loo qoondeeyay, waxaa meel kale loogu rari karaa ogolaanshaha Golaha Wakiilada.
3. Wasaarada Maaliyadu waxay M/waynaha u soo jeedinaysaa iyadoo sababaysan in kharash madax loo wareejiyo madax kale qayb ka mid ah ama dhammaantii ama kharash hay'ad, wasaarad ama maamul u qoondaysan loo wareejiyo qayb ka mid ah ama dhammaantii hay'ad, wasaarad ama maamul kale.

4. M/waynuhu marka uu helo soo jeedinta ku xusan faqrada 3aad, wuxuu u gudbinayaa Gudoomiyaha Golaha Wakiilada si loogu soo ogolaado.
5. Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu marka uu helo dalabka ku xusan faqrada 4aad ee qodobkan, wuxuu ogolaan karaa ama diidi karaa ka dib marka uu la tashado guddi hoosaadka u xilsaaran miisaaniyada, Goleweynahana la socodsiiyo.

CUTUBKA 3AAD
FULINTA IYO DABAGALKA

Qod: 29 aad
Fulinta Miisaaniyada

1. Guud ahaan xukuumada iyo gaar ahaan Wasaarada Maaliyada waxaa waajib ku ah in miisaaniyada loogu dhaqmo sida Golaha Wakiiladu u ansixiyay.
2. Soo ururinta dhakhliga miisaaniyada iyo gelida kharashyada miisaaniyada waxaa loo raacayaa xeerarka u degsan nidaamka maaliyada iyo xisaabaadka dalka.
3. Xisaabiyaha Guud ee Qaranka iyo Hanti-Dhawrka guud, waxaa xil ka saran yahay in si joogta ah u kormeeraan una dabagalaan fulinta miisaaniyada iyo qaabka loo isticmaalay inuu sax ku yahay.
4. Wasaarada maaliyadu waa in Golaha Wakiilada u soo gudbisaa lixdii biloodba mar warbixin koobaysa:
   B) Dakhliga soo hoyday oo la bar-bardhigay Odoroska miisaaniyada.
   T) Kharashka baxay oo la bar-bardhigay Odoroska miisaaniyada.

Qod: 30aad
Dabagalka Fulinta miisaaniyada

1. Golaha wakiiladu wuxuu awood u leeyahay in uu ku dabagalo xukuumada fulinta miisaaniyada..
2. Guddida ku shaqadaleh miisaaniyada waxaa ku waajib ah in ay dabagalaan, kormeeraan hubiyaan, kana war hayaan in xukuumadu ugu dhaqantay miisaaniyada sidii loogu ansixiyay.
3. Guddida waxay Golaha ka siinayaan warbixino dhawrkii biloodba mar ama markasta oo loo baahdo sida loogu dhaqmay iyo fulintiisu u socoto
4. Guddidu waxay markasta oo loo baahdo tallooyin iyo tilmaamo u gudbin karaan Wasaarada Maaliyada, Xisaabiyaha guud, hanti dhawraha guud, hogaanka iyo saraakiisha hay'ad kasta ama maamul kasta oo dhakhli soo saaer iyo mid kasta oo miisaaniyadiisa si gaar ah loogu ansixiyay iyo maamulada D/hoose ee degmooyinka dalka.
5. Guddi hoosaadku waxay kaloo dabagal iyo ku yeelanayaan maamulada D/hoose iyo sida ay miisaaniyadahooda ugu dhaqmaan.

Qod: 31aad
Xisaab xidhka Miisaaniyada

1. Miisaaniyad sanadeed kasta xisaab xidhkiisa waxaa xukuumadu soo gudbinaysaa Golaha Sida ku cad Qodobka 55aad, Faqrada 6aad ee Dastuurka.
2. Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu wuxuu u gudbinayaa xisaab xidhka guddi hoosaadka dhaqaalaha si uu deraasad ugu soo sameeyo warbixin iyo talooyina uga soo diyaariyo Golaha
3. Guddida ku shaqadaleh miisaaniyada marka uu dhamaystiro deraasadooda iyo xogtooda, wuxuu Golaha ka horjeedinayaan warbixin talooyin xambaarsan oo la xidhiidha sida miisaaniyada loogu dhaqmay iyo dhaliilaha uu lahaa ku dhaqankaasi waxayna tallo ku soo jeedinayaan in la qaato muddo aan ka badnayn 30 maalmood iyagoo u gudbinaya guddi hoosaaka ilaalinta iyo daryeelka hantida qaranka ee Golaha Wakiilada**.**
4. Guluhu xisaab xidhka wuu ansixin karaa ama wuxuu ku celin karaa Hanti-dhawrka isagoo talooyin iyo tilmaamo raacinaya si loo soo saxo amba loo qabyo-tiro Mudo 45 maalmood gudahood ah.

Qodobka 32aad
Hantida Macaawinada ah ee Dawlada lagu wareejiyo

Waa in loo maamulo, loo xisaabiyo, loo hantidhawro, loogana warbixiyo si waafaqsan Dastuurka Qaranka, xeerkan miisaaniyada iyo xeerarka kale ee maaliyadeed ee dalka u yaala.

Qodobka: 33aad
Wax ka bedelka xeerka

Xeerka miisaaniyadu waa xeer maaliyadeed, waxaa wax ka bedeli kara oo keliya Gollaha Wakiilada marka xukuumadu soo jeediso ama mooshin ay ku soo jeediyaan wax ka bedelkiisa tirade mudanayaasha xeer hoosaadka ku xusan.

Qodobka: 34aad
Laalid

Waxa la laalay xeer kasta oo ka hor imanaya xeerkan ee ku saabsan arrimaha maaliyada **.**

Qodobka 35aad
Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxa loo adeegsan-karaa xuduudaha Jamhuuriyada Somaliland

Qodobka: 36aad
Dhaqangalka xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo M/waynuhuna saxeexo.

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)	**C/risaaq Siciid Ayaanle**
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSl	**K/simaha Xoghayaha Guud ee G. Wakiilada**